

Maxay tahay muhiimadda hiwaayadda?

Hiwaayadaha carruurta iyo dhallinyaradu waxay baran karaan xirfado cusub, waxayna ogaan karaan waxa ay ku fiican yihiin oo ay saaxiibo samaysan karaan. Xiisaynta iyo ka helista hiwaayadda waxa ay xoojineysaa kobcinta carruurta iyo dhallinyada. Carruurta iyo dhallinyaradu waxay bartaan inay naftooda mas'uuliyad iska saaraan oo ay go'aansadaan wax wada qabadka ay tiigsanayaan. Deegaan hiwaayad badbaado leh, waxaan si wada jir ah u baranaa inaan tixgelinno kuwa kale oo aan u wada shaqeyno koox ahaan.

Oggolaanshaha waxqabadka hiwaayadda

Waxbarashada aasaasiga ahi waxay toddobaad kasta u qaban qaabisaa hawlo hiwaayad bilaash ah oo joogto ah dhammaan ardayda fasallada 1-9.

Hiwaayaduhu badanaa waa galabtii iskoolka markuu dhammaado. Waxaa la helayaa boqolaal hiwaayadood wiiggii. Kooxaha oggolaanshaha hiwaayadda waxaa laga heli karaa dhammaan iskoolada iyo meelaha hiwaayadaha kala duwan ee magaalada. Ardaygu wuu iska diiwaan gelin karaa meel kasta, hiwaayadaha loogu talagalay kooxaha da'diisa.

Kooxaha oggolaanshaha hiwaayadda waxaad ka heleysaa

[Jadwalka hiwaayadaha /](#)

<https://lyyti.fi/e/cal/lupa-liikkua-lupa-harrastaa.html>



lupaliikkua@harrastaa@tampere.fi

[Lupa liikkua Lupa harrastaa activities | www.tampere.fi](http://www.tampere.fi)

LUPA LIKKUA.
LUPA HARRASTAA.

TAMPERE.
FINLAND

